Coronavirus

COVID-19

International Protection Accommodation Services (IPAS) COVID-19 Update

Wararka COVID-19 ee Cusub

An Roinn Dlí agus Cirt agus Comhionannais
Department of Justice and Equality

9 Setembar 2020

Wararkii ugu dambeeyay ee COVID-19 ee loogu talagalay degganayaasha - Cadadka 23

Degganeyaasha Qaaliga ah,

Fadlan hel cadadka ugu dambeeyay ee warsidahaaga. Cadadkan wuxuu bixinayaa macluumaad muhiim ah ee ku saabsan **baaritaan** soo socda ee **COVID-19 ee ka dhacaya gudaha Xarumaha Direct Provision.** Waxaan ku dhiiri galin lahayn degganeyaadha dhamaan inay wakhti ku qaataan si ay u ogaadaan macluumaadka la siiyay.

Toddobaadyada soo socda, dhammaan degganeyaasha iyo shaqaalaha Xarumaha Direct Provision waxaa loo soo bandhigi doonaa baaritaanka COVID-19. Baarintaanka waa ikhtiyaari. Waa taxaddar waana wax ay Xukuumaddu ku talisay.

Dawladdu waxay ka walwalsan tahay tirada dadka ku nool Xarumaha Direct Provision oo baaritaano looga helay cudurka COVID-19. Hay'adda Adeega Caafimaadka (HSE) waxay fulineysaa baaritaanka cudurka COVID-19 si ay u caawiso in si dhakhso ah loo ogaado kiisaska. Baaritaanka wuxuu naga caawin doonaa go'aaminta baahida loo qabo taageerada dheeraad ah ee xagga Caafimaadka Dadweynaha.

Baaritaanadu waxay kaloo noo sheegaysaa haddii tallaabooyinka aan u dajinay Xarumaha Direct Provision ay shaqeynayaan. Mar walba oo aan helno macluumaadka sii badan, waxaa sii kordhaya fikradaha aan ka haysanno sida fayraskani u faafi karo iyo waxa aan ka qaban karno si aan u joojino.

Wargeyskan waxaa sidoo kale laga heli karaa websaydka loogu talagalay xarumaha hoyga qaybta 'Degganeyaasha' oo ay weheliso turjumaado ah luqado kala duwan.

Ugu dambeyntiina, waxaan jeclaan lahayn inaan kaaga mahadcelino wada shaqeyntaada joogtada ah waxaanan kuu rajeynaynaa caafimaad wanaagsan.

Kooxda IPAS

Yaa cudurka laga baarayaa?

Dhammaan degganeyaasha iyo shaqaalaha Xarumaha Direct Provision waxaa loo soo bandhigi doonaa baaritaanka cudurka COVID-19. Ma baari doono carruurta da'doodu ka yar tahay 5 jir. Carruurta da'doodu u dhexeyso 5 ilaa 16 sano waxaa lagu baari karaa markey codsadaan oo ay oggolaadaan waalidkooda ama ilaaliyehooda.

Degane kasta iyo xubin kasta oo ka mid ah shaqaalaha waxay yeelan doonaan 1 baaritaan. Baaritaanku waa ikhtiyaari. Waad go'aansan kartaa inaad diido in lagaaga baaro COVID-19 gudaha xaruntaada. Shaqaalaha Hay'adda Adeega Caafimaadka (HSE) ayaa kuu sharxi doona waxa dhacaya inta lagu jiro baaritaanka.

Baaritaanka cudurka COVID-19 waa tillaabo caafimaadka bulshada si loo hubiyo badbaadada dhammaan degganeyaasha iyo shaqaalaha. Wax saamayn sinnaba ah kuma yeelanayso xaaladdaada ama codsigaaga magangalyada caalamiga ah. Haddii aad su'aalo dheeraad ah ka qabtid baaritaanka COVID-19, fadlan la hadal maamulaha xaruntaada.

Dawladdu waxay go'aansan doontaa haddii loo baahdo baaritaan dheeraad ah.

Goorma ayuu baaritaanka dhici doonaa?

Maamulahaaga Xarunta ayaa kuu sheegi doona taariikhda iyo wakhtiga lagaa qaadi doono baaritaanka.

Fadlan hubi inaad joogto xaruntaada taariikhdaas iyo wakhtigaas.

Fadlan u sheeg maamulaha xaruntaada haddii taasi aysan suurtagal ahayn.

Sidee ayuu u dhici doonaa baaritaanka?

Xarumo Direct Provision oo badan ayaa ah goobo lagu badan yahay ama meelo la wadaago oo ay dad badani joogaan. Tani macnaheedu waa in dhammaan degganeyaasha lagu dhiirri geliyo inay u hoggaansamaan baarintaanka lagu sameeyo xarunta dhexdeeda, iyadoo la daneynayo caafimaadka dadweynaha iyo badbaadadaada iyo badbaadada dhammaan degganeyaasha kale. Haddii aad ka walwal qabto baarintaanka, fadlan horay ugu sii sheeg Maamulaha Xaruntaada

Maamulaha Xaruntaada ayaa ku weydiin doona lambarka taleefankaaga.

Macluumaadkan waxaa adeegsan doona Hay'adda Adeega Caafimaadka (HSE) si ay kaagala soo xiriiraan natiijada baaritaankaaga.

Ma qasab baa in la iga baaro COVID-19?

Waad dooran kartaa inaad diido in lagaaga baaro COVID-19 xaruntaada.

Baaritaanka waa ikhtiyaari.

Shaqaalaha Hay'adda Adeega Caafimaadka (HSE) ayaa kuu sharxi doona waxa dhacaya inta lagu jiro baaritaanka.

Maxaa dhacaya inta lagu jiro baaritaanka?

Waxaa jira laba marxaladood ee Baaritaanka COVID-19:

Marxaladda 1 – Diyaarinta

- Waxaad heli doontaa baakad oo ay la socoto warqad-macluumaad, tiish iyo maaskaro.
- Waxaa lagu weydiin doonaa inaad maaskaro xirto. Ha ka saarin illaa inta lagu farayo inaad sidaa sameyso.

Marxaladda 2 – Imtixaanka

- Waxaa lagu weydiin doonaa inaad tagto mid ka mid ah saldhigyada baaritaanka.
- Waxaa lagu weydiin doonaa inaad hoos u dajiso maaskaradaada.
- Waxaa lagu weydiin doonaa inaad madaxaaga gadaal u qaado oo aad afkaaga kala qaaddo.
- Muunad/sambal ayaa laga qaadayaa gadaasha cunahaaga iyo sambal kale ayaa laga qaadi doonaa sankaaga. Sambal qaadida ayaa laga yaabaa inuu uusan raaxo lahayn laakiinse waxyeelo kuma gaarsiin doono.
- Waxaa lagu weydiin doonaa inaad dib u gashato maaskarada.
- Waxaa lagu weydiin doonaa inaad ka tagto Xarunta baaritaanka oo aad qolkaaga dib ugu laabato.

Fadlan ha ka welwelin baaritaanka. Waa mid toos ah oo dhaqso ah. Shaqaalaha caafimaadka ee baaritaanka sameynaya ayaa qabi doona qalab is ilaalinta ah sida muraayadaha indhaha iyo maaskaro. Shaqaalaha caafimaadka ayaa sidoo kale ku weydiin kara su'aalo guud oo ku saabsan caafimaadkaaga.

Miyaa la baarayaa caruurta?

Haddii ilmahaagu uu u dhaxeeyo 5 ilaa 16 sano jir, adiga oo ah waalidkooda/ilaaliyahooda waxaad bixin kartaa ogolaansho si loo baaro.

Daawo fiidiyowgan si aad wax badan uga ogaato waxa dhaca inta lagu jiro baaritaanka. Fiidiyowga waa mid ku habboon inay carruurtu daawadaan.

Fiidiyowga sidoo kale waxaa laga heli karaa halkan:
https://www.facebook.com/BetterTogetherCork/videos/3083486155047842/

Goormaan helayaa natiijada?

Waxaa laga yaabaa inaad sugto 3 maalmood natiijooyinkaaga baaritaanka.

Natiijooyinka baaritaanka ee dhammaan degganeyaasha waxaa laga yaabaa inaysan diyaar noqon isku wakhti.

Sideen ku helayaa natiijada?

Waxaad ku heli doontaa natiijadaada baaritaanka fariin qoraal ah ama taleefan ayaa laguugu soo diri.

Ilaa intaad ka heleyso natiijadaada baaritaanka, waxaa muhiim ah inaad ku dhaqanto kala fogaanshaha bulshada oo aad ka fogaato meelaha la wadaago ee xaruntaada.

Waxaa sidoo kale lagaa codsan karaa inaad is-go'doomeysid illaa aad ka heleyso natiijooyinkaaga baaritaanka.

Maxaa dhacaya haddii uu baaritaankeygu noqdo “lama helin” COVID-19?

Haddii baaritaankaaga uu noqdo 'lama helin' COVID-19, waxaad heli doontaa farriin qoraal ah. Fadlan la soco inuu wali aad qaadi karto COVID-19 mustaqbalka.

Waa inaad sii wadaa inaad raacdo tilmaamaha si aad u ilaaliso naftaada iyo dadka kale.

Maxaa dhacaya haddii baaritaanka la igaga helo ama uu noqdo bositif COVID-19?

Ha baqin. Dadka badankood ee qaada cudurka COVID-19 waxay lahaadaan calaamado/astaamo khafiif ilaa iyo dhexdhexaad ah oo qaar badana malaha wax calaamado ah. Laakiinse xitaa haddii aad leedahay calaamado khafiif ah, ama aadan lahayn wax calaamado ah, wali waad ku faafin kartaa fayraska dadka kale sidaa darteed waxaad u baahan doontaa inaad is-go’doomiso (is-karantiimeyso).

Haddii uu baaritaankaagu noqdo bositif cudurka COVID-19, Hay’ada Adeega Caafimaadka (HSE) ayaa ku soo wici doona. Waxay ka jawaabi doonaan wixii su'aalo ah oo aad qabtid.

Waxay ku weydiin doonaan magaca iyo faahfaahinta xiriirka qofkasta oo aad si dhow ula xiriirtay 14-kii maalmood ee la soo dhaafay. Tani waxaa loo yaqaan dib-uraacida xiriirka (contact tracing). Tani waa si ay ugu sheegaan dadkaas inay iyaguna u baahan doonaan inay is-go’doomiyaan (is-karantiimeeyaan). Waxay caawini kartaa yareenta faafitaanka fayraska.

Waxaa lagaa codsan doonaa inaad is-go’doomeyso (is-karantiimeyso) illaa ay dhacaan labadan qodob:

- aadan qandho qabin 5 maalmood.
- laga soo wareego ugu yaraan 14 maalmood tan iyo taariikhda baaritaankaaga.
- Waa laguu soo sheegi doonaa haddii aad u baahan tahay inaad is-go'doomiso (is-karantiimeyso) in ka badan 14 maalmood.

Ka waran haddii aan u baahdo inaan is-go'doomiso (is-karantiimeeyo)?



Waxaa laguu sameyn doonaa qabanqaabin aad inaad is-go'doomiso (is-karantiimeyso) meel ka baxsan goobta ee ah xarunta go'doonka. Waxaa lagaa codsan doonaa inaad diyaarsato alaab kugu filan muddada go'doomintaada (ka eeg liiska halkan).

Gaadiid ayuu kuu qababqaabin doonaa maamulaha xarunta.

Adeegyo taageerid ayaa ku soo kormeeri doona maalin walba inta aad is-go'doominta ku jirto. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan is-go'doominta ayaa laga heli karaa:

https://www.hse.ie/eng/about/who/primarycare/socialinclusion/intercultural-health/translations-and-easy-read-documents.html

Maxaa dhacaya haddii aan xiriir dhow la leeyahay qof jooga xaruntayda oo cudurka laga helay?

Waa laguu sheegi doonaa haddii aad xiriir dhow la leedahay qof baaritaankiisu noqday bositif ama uu cudurka qabo.

Caafimaadka Dadweynaha ayaa kaala talin doona haddii aad u baahan tahay inaad is-go'doomiso.

Sideen u daaweyn karaa COVID-19?

Ma jiro wax tallaalid ah ama daawo ah oo loo hayo COVID-19.

Dadka badankood ee qaada cudurka COVID-19 waxay lahaadaan calaamado/astaamo khafiif ilaa iyo dhexdhexaad ah oo qaarkoodna malaha wax calaamado ah. Laakiinse xitaa haddii aad leedahay calaamado khafiif ah, ama aadan lahayn calaamado, wali waad ku faafin kartaa fayraska dadka kale sidaa darteed waxaad u baahan doontaa inaad is-go’doomiso (is-karantiimeyso).

Haddii calaamadahaagu sii socdaan ama ka sii darsadaan, u sheeg xubin ka mid ah shaqaalaha xarunta ee wici kara dhakhtar.

Maxaa ku dhacaya caruurtayda haddii cudurka la iga helo?

Qabanqaabo ayaa la samayn doonaa si ay qoyskaagu u sameeyaan go'doomin wadajir ah.

Yaa kale ayaa arki doona natiijadeyda baaritaanka?

Natiijadaada waxaa sidoo kale loo diri doonaa dhakhtarka masuulka ka ah baaritaanka ee xaruntaada.

Marka laguu sheego natiijadaada, IPAS iyo Maamulaha Xarunta ayaa la ogeysiin doonaa si ay u diyaariyaan taageerid ama qabanqaabin gaar ah si ay kuu caawiyaan.

Maxaa dhacaya haddii xubin ka mid ah shaqaalaha laga helo cudurka COVID-19?

Haddii xubin ka tirsan shaqaalaha xaruntaada uu qabo cudurka COVID-19, waxaa looga baahan doonaa inay is-go'doomiyaan (is-karantiimeeyaan).

Tallaabooyinkan ay qaadayaan labada dhinac ee shaqaalaha iyo degganeyaasha ee qaba cudurka COVID-19 ayaa lagama maarmaan u ah hubinta caafimaadka iyo fay-qabka qof walba ee ku sugan xarunta.

Maxaa dhacaya haddii dhowr qof oo jooga xaruntayda ay qaadaan cudurka COVID-19?

Dhammaan degganeyaasha waxaa laga codsan doonaa inay xaddidaan dhaq-dhaqaaqooda haddii laba ama in ka badan oo degganeyaasha ay baaritaanka looga helo cudurka COVID-19. Tani macnaheedu waa in qof walba uu ku qasbanaan doono inuu:

- joojiyo tagida shaqada;
- joojiyo tagida dugsiga ama jaamacada;
- ku sii wado ku dhaqmida kala fogaanshaha bulshada gudaha xarunta;
- sii wado ku dhaqanka nadaafadda shaqsiyeed ee wanaagsan; iyo
- joojiyo isticmaalka gaadiidka dadweynaha.

Waxaad u bixi kartaa banaanka si aad u tagto ballanta caafimaadeed. Waad u bixi kartaa banaanka si aad jimicsi u sameyso kaligaa ama la sameyso qoyskaaga.

Maamulka xarunta ayaa qabanqaabin doona sidii ay kuu siin lahaayeen cunto, iyo waxyaabo kale inta lagu jiro wakhtigaa.

Waxaa igu adkaatay la qabsiga oo aad baan u walwalayaa oo waan niyad jabay. Ma heli karaa wax taageerid ah?

Kani waa wakhti adag oo dhibaato ku soo kurdhiyey qof walba. Baaritaanka COVID-19 waa tillaabo caafimaad bulshadeed si loo hubiyo badbaadada dhammaan degganeyaasha iyo shaqaalaha.

Saamayn sinnaba ah kuma yeelanayso xaaladdaada ama codsigaaga magangalyada caalamiga.

Macluumaadka ku saabsan daryeelka fay-qabka maskaxdaada waxaa laga heli karaa: https://www2.hse.ie/wellbeing/mental-health/covid-19/minding-your-mental-health-during-the-coronavirus-outbreak.html

Macluumaad dheeraad ah

Is-go'dominta (is-karantiimeenta), meel isku haynta iyo waxyaabo dheeraad ah
https://www.hse.ie/eng/about/who/primarycare/socialinclusion/intercultural-health/translations-and-easy-read-documents.html

ilaha la turjumay
https://www.hse.ie/eng/services/news/newsfeatures/covid19-updates/partner-resources/covid-19-translated-resources/

Adeegga Caalamiga ah ee COVID-19

Khadka-caawinta Taleefanka-Lacag-la’aanta ah ee Degganeyaasha - 1800 929 008

Khadka-caawinta taleefanka-Lacag-la’aanta ah ayaa loo sameeyay si loo taageero degganeyaasha inta lagu jiro COVID-19.

Waxaan fahamsanahay in uusan qof walba dareemin kalsooni inuu si toos ah ula xiriiro Waaxda sidaas darteed waa muhiim in la ogaado iyadoo IPAS ay sameysay khadkan-caawinta, waxaa maamusho hay'ad samafal ah - Adeegga Qaxootiga ee Jesuit (Ireland).

Fadlan noogu soo sheeg IPASinbox@justice.ie haddii ay jiraan mowduucyo kale oo aad jeclaan lahayd inaan ku soo darno wargeyskeena. Waxaan rajeyneynaa in macluumaadka halkaan lagu bixiyey ay ahaayeen mid wax tar leh.

Iyadoo aan kuu rajayneyno rajo aad u wanaagsan oo ka socda kooxda IPAS iyo Waaxda Caddaaladda iyo Sinaanta.

An Roinn Dlí agus Cirt agus Comhionannais
Department of Justice and Equality

Macluumaadka ku qoran warbixintan ugu dambeysay waxaa loogu talagalay degganayaasha xarumaha hoyga IPAS, Saaxiibada Kooxaha Xarunta (Friends of the Centre Groups) iyo asxaabta NGO-yada. Wixii su’aalo ah ama fikrado ah waxaa loo diri karaa IPASinbox@justice.ie